JamhuuriyaddaFederaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Xafiiska Guddoonka

Warbixinta Golaha Shacabka Ku Saabsan Kalfadhiga 3-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA.

10ka Sebteembar ilaa 22ka Jenaayo 2014

Tusmo:

QEYBTA 1AAD: **HADALJEEDINTA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA OO KU AADDAN MUNAASABADDA XIRITAANKA KALFADHIGA 1AAD 3**

QEYBTA 2AAD: **SOO-KOOBID WARBIXINTA HAWLAHA GOLAHA GUUD AHAAN 13**

QEYBTA 3AAD: **HAWLAHA HIRGALAY KALFADHIGA 1-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA 21-ka AGOOSTO – 30-ka DISEEMBAR 2012 ..... 13**

QEYBTA 4AAD: **WUFUUDDA HEER CAALAMI EE SOO BOOQDAY BAARLAMAANKA..... 16**

QEYBTA 5AAD: **WUFUUDDA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKU QAABILAY KALFADHIGA 1AAD.....** Error! Bookmark not defined.

QEYBTA 1AAD: HADALJEEDINTA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA OO KU AADDAN MUNAASABADDA XIRITAANKA KALFADHIGA 3AAD

1 HORDHAC

Kulankeenan maanta waxaynu isugu nimid xiritaanka Kalfadhiga 3aad ee Golaha Shacabka Soomaaliyeed iyo in aan gunaanadno Sannad Buuxa oo xiriir ah oo Baarlamaankanu soo dhammeystay, isagoo ku shaqaynaaya Dastuurka Federaalka Soomaaliya. Wuxuu ahaa Sannad xambaarsan dhacdooyin xasuus leh! Arrimo badan Ayaan lasoo kulanay, hawlo badanna waynu soo qabanay. Sidaa daraadeed waxaa loo baahan yahay in aynu yara hakano, si aynu dib ugu jaleecno waxyaabihii inoo qabsoomay sannadkii 2013 aynu soo dhaafnay, isla markaana u qiimeyno horumarkii aynu sameynay, aynuna eegno waxyaabaha aynu sii wanaajin karno, innagoo ka fekereyna hawlaha ina sugaya ee sannadkan 2014. Waxaa kale oo loo baahan yahay in aynu is weydiino: maxaynu waxtar ku soo kordhinay nolosha dadkeena?

Hadaba mid-mid aan usoo qaadno waxyaabaha ilaa imminka inoo qabsoomay, oo aan ku bilowno isbedellada kuraasta Golaheena taniyo bilowgii Madasha Baarlamaankeenan. Marka horese aan in yar hakano oo is xasuusino mar kale xubinaha Baarlamaankeena ka mid ahaa oo geeriyooday iyadoo qaarkood aynu ku weynay qalaalasaha iyo dilka dalkeena ka socda, waxaa ka mid ahaa:

1. M.ne Mustaf Mohamed Abdullahi - RaximahuLlaah
2. M.ne Hussein Abdisalam Ahmed - RaximahuLlaah
3. M.ne Mohamed Warsame Mohamed “Faysal - RaximahuLlaah

Waxaa iyagana jirro caadi ah ku geeriyooday (5) xubnood kuwaas oo kala ahaa:

1. M.ne Sheik Nor Ali Adan - RaximahuLlaah
2. M.ne Mohamud Isma’il Barkhadle - RaximahuLlaah
3. M.ne Mohamed Farah Jima’le - RaximahuLlaah
4. M.ne Omar Islow Mohamed - RaximahuLlaah
5. M.ne Hassan Muhumad Ali “Sokorliin” - RaximahuLlaah

Reerihii walaaleheenaa ay ka geeriyoodeen waxaan Allahu swt uga baryeynaa in Samir iyo Iimaan naga wada siiyo, iyagana Jannadiisa Firdowsa ka waraabiyo. Waxaynu maantana shacbiga soomaaliyeed mar kale u caddeyneynaa in aynu u guntanahay oo Bi-idiniLlaahi swt oo aan marna gabi doonin ka shaqaynta sidii nabad iyo caddaalad ay ummadda Soomaaliyeed oo dhami u heli lahayd, ammaan iyo xasillonida dalka loogu fidin lahaa. Shacbi iyo Dawladba aan u wada guntano gaarista

himilooyinkaas. Waxaana naga dardaaran ah in aanay marna na qalbijebin ujeddoxumida iyo falgallada argagixisada.

Waxaa kaloo xubinnimada Golaha asbaabo kala duwan iskooda uga istiqaalooday (9) xubnood

1. M.ne Hassan Sheik Mohamud
2. M.ne Mohamud Ahmed Nor (Tarsan)
3. M.ne Hussein Khalif Jama
4. M.ne Abdiwali Mohamed Gaas
5. M.ne Bashir Mohamed Jama
6. M.ne Ahmed Ismail Samatar
7. M.ne Siyad Mohamud Shire
8. M.ne Mohamed Qenyare Afrah
9. M.ne Muse Hassan Abdulle

Wadar ahaa muddada aan soo sheegay waxaa bannaanaatay (17) kursi o dhamaantood loo soo Wada buuxiyey si waafaqsan Qaraar Golaha Shacabka xeeriyey 26kii Noofembar 2013 kuna Saabsanaa Habraaca Soo Buuxinta Kursiga ka Banaanaada Golahan.

2 MAXAYNU QABANAY ILAA IYO IMMINKA

Ilaa iyo imminka waxaynu golahan xeeriyay Hindise Sharciyeedyo, Heshiisyo, Qaraarro iyo dajin Miisaaniyadeed, iyagoo ay u dheer tahay hawlgal baaxadweyn oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Xeer-Hoosaadkiisa. Hadaba Hindise Sharciyeedyada, Heshiisyada iyo Qaraarada uu golahan xeeriyey Waxaa ka mid ah:

A. Hindise Sharciyeedyada la ansixiyey

1. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.
2. Hindise Sharciyeedka Maamulka Gobolada iyo Degmooyiinka Dalka
3. Hindise Sharciyeedka Arrimaha Dibadda.

B. Hindise Sharciyeedyada sugaya codka ansixinta

1. Hindise Sharciyeedka Kaluumeysiga
2. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Machadka Barashada Culuumta Badda

C. Hindise Sharciyeedyada sugaya akhrinta 3aad

1. Hindise Sharciyeedka La Dagaalanka Argagaxisada
2. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyiinka

3. Hindise Sharciyeedka Bangiga Horumarinta

D. Hindise Sharciyeedyada sugaya akhrinta 2aad

1. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Federaalka iyo Xuduudaha
2. Hindise Sharciyeedka Maal-geshiga Shisheeye
3. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Xuquuqda Aadanaha
4. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Qaranka ee Dib-u-dhiska Qaxootiga iyo Barakacayaasha.

E. Hindise Sharciyeedyada sugaya akhrinta 1aad

1. Hindise Sharciyeedka Summada Ganacsiga
2. Hindise Sharciyeedka Shatiga Ganacsiga

F. Hindise Sharciyeedyada aan la ansixin

1. Hindise Sharciyeedka Gardoonka

Heshiisyada La ansixiyey

1. Heshiiskii Taageerida Militariga Somaaliya iyo Turkey
2. Heshiiskii Contonou

Heshiis aan la ansixin

1. Heshiiska Favori ee Garoonka Dayuuradaha
2. Heshiiska Difaaca ee Soomaaliya iyo Talyaani

Qaraarro

1. Qaraar Golaha Shacabka Ugu Fasaxay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya In Ay Saxiixdo Oo Ansixiso Brotokoolka Lagu Dhisay Golaha Nabadda Iyo Ammaanka Ee Midowga Afrika
2. Samaynta Curaarta Daryeelka Degdeg Ah Ee Xildhibaanada
3. Habraaca Soo Buuxinta Kursiga Banaanaada

Ansixin Miisaaniyad

1. Kabid Miisaaniyad
2. Miisaaniyadda Seddex biloodlaha ee 2013

Alxamdu-Lillaah, Baarlamaankanu wuxuu sannadkii iyo 4 bilood uu jiray soo qabtay hawl badan iyo wax soo saar la taaban karo. Arrintaasi waa mid aynu isugu hambalyeen karno. Haseyeeshee, ma aha in aynu marnaba isdhigano ama debcino hawlgalkeena. Hawsha ina sugeysaa aad bey u badan tahay, hawlqadabkeenana weynu ka sii badin kari lahayn intaynu qabanay haddii ay guddiyadeenu heli

lahaayeen qoondadii ay ku lahaayeen Miisaaniyadda ku talagalka loo ansixiyey Baarlamaanka 2013.

Marka la eeggo waxqabadka baarlamaanka, waxaa cad in loo baahan yahay in la sii kordhiyo is xilqaan dheeri ahna laga sameeyo ilaalinta waqtiga iyo ilaalinta asluub-wanaagga xildhibaannimada. Marka laysku celceliyo, waxay u muuqataa in fadhiga guud ee Baarlamanku uusan fariisan wax ka badan 20 ilaa 25 saacadood bishiiba. Maalmaha qaar, baarlamaanku wuxuu xaqiiq ahaan fadhiistaa wax ka yar saacad keliya. Arrintaasi Waxaa lagu oggolaan karaa oo ay maangal ku noqon kartaa keliya, haddii arrimaha ajendada ee la horkeenayo Goluhu ay Guddiyada soo geliyaan saacaado shaqo badan iyo maalmo-shaqo badan, dadaalkaas oo fadhigga guud ee Golaha u fududeynayo in ay saacado gaaban uga go'aan gaaraan. Waxaan mar kale naga xusuusin ah in hawsha ugu badan ee Baarlamaanka ay ka soo fusho hawlgalka guddiyadiisa marka ay fulinayaan waajibaadkooda sharcidajineed, korjooteynta iyo u kuurgelidda hawqabadka Xukuumadda, Guddiyada iyo Hay'adaha madaxbannaan iyo sidoo kale baaritaannada ama dhageysiyada arrimaha shacabku daneynayo. Sidaas awgeed waa ineynu xoojinaa isla markaasna taageero dhaqaale, farsamo iyo tayodhisid xubnaha guddiyada u helnaa guddiyadeena si aynu u wajahno waajibaadka masiiriga ah ee ina horyaala.

Hadaanu sii jaleecno hawlgalkeena fadhiyada guud, soo xaadiridda xubnaha fadhiyadu nasiib darro waa mid ka hooseeya heerkii la rabay. Xubno badan ayaa waqti danbe yimaada, qaarkoodna waaba haddiiba ay yimaadaan. Waxay u eg tahay, inkastoo aanu dadaal badan samaynay, si sarriig iyo xurmadaynta xildhibaannimo mudnaa kula hadalnay, hadana ma suuragelin in loo maara helo toosinta anshaxa shaqowanaagga ee Xubinnimada Golahan looga baahan yahay. Xildhibaano badan oo ku dayasho muddan ayaa ka mid ah golaheena, kuwaas oo si xilkasnima leh u guta waajibaadkooda ugana soo xaadira fadhiyada guud ee golahan iyo sidoo kale fadhiyada guddiyada. Mahad ballaaran ayaan u jeedinayaa xubnahaas. Waxaase cadaalad daro ku ah kuwa waajibkooda si hufan u guta in la la meeldhigo dhigooda aan soo xaadirin ama soo daaha oo daraadood guntanka loo waayo ama kalifa in furitaanka fadhiyada guud dib u dhaco. Waxaa wargelin naga ah ineynu laga billaabo kalfadhiga 4aad ku fulin doonno faritaannada Xeer-Hoosaadka ee Anshaxmarinta xubnaha gudan waaya waajibaadkooda. Sidaa daraadeed waxaan fareynaa Guddiga Xeer-Hoosaadka, Anshaxa iyo Daryeelka Xildhibaanadu iyo Xafiiska Habdhowrayaashu in aanay yareysan arrintan ayna ka hawlgalaan shaqo wanaajinta xubnaha Golaheena. Waa in si dhab ah loo eegaa sidii tallaabooyin anshaxmarin ah looga qaadi lahaa xubnaha aan soo xaadirin fadhiyada ama aan dhowrin Xeer-Hoosaadka Golaha.

Waxaase runtii jirtay marar ay arrintu ka geddisneyd sida aynu kor ku soo xusnay. Waxaan tusaale u soo qaadanayaa dhowaan, mararkii ay socdeen Mooshinkii cod kala noqoshada Xukuumadda, ansixinta R/Wasaaraha cusub, Xukuumadda iyo Barnaamijkeeda. Munaasabadaahaasi waa kuwo muddan in aan fiiro gaar ah u yeelano, sababtoo ah munaasabadahaas Baarlamaanku waxa soo xaadiray tiro badan oo aan loogu arag marka Goluhu gudnaayo xilkiisa caadiga ah ee sharcidejinta, xamaasadda siyaasadeed heerka ay gaadhayna waxay ahayd arrin ugub ah, haddii laga reebo markii xubnaha Golaha loo dhaarinayey Madasha Baarlamaanka 9-aad oo soo bilaabatay Agoosto 2012. Anigoo ku ammaanaya dhaqankii biseylka lahaa ee ay xildhibaannadu u guteen waajibaadkooda Dastuuriga ah ee ku xusan Qodobka 69-aad Faqradihiisa 2-aad (d) iyo (e), haddana waxaa xusuusin muddan inaanu sidaas si la mid ah heegan ugu ahaano gudashada waajibaadka tirada badan ee uu isla qodobkaasi ina farayo.

Dhinaca kale ee wanaagsan marka aynu jaleecno, waxaaynu dheehan karnaa ololeyaal siyaasadeed xoog badan la galay marxalado kala duwan oo Goluhu ku jiray ansixin hindiseyaal sharci xubnuhu ku kala aragti fogaa hadana lagu xalliyey si dimuqraaddi ah oo danta dalka u roon. Taasi waxay tusaale u tahay koboca biseylka siyaasadeed ee baarlamaaniyiinta, waxayna aragtiyahaas iyo fikradahaas saldhig u noqon karaan abuuritaanka axsaab siyaasadeed, oo waxay runtii sii xoojineyaan baahida loo qabo in mustaqbalka dhow la dejiyo sharciga uu ku dhismi lahaa, oo dalka Jumhuuriyadda ugu jiri lahaa nidaamka axsaabta badan, oo soo si nabadgelyo iyo dimoqraaddi ah ugu tartama hogaaminta siyaasadda dalka, iyo in lagu baxaalliyo diyaarinta dhallinyarada xilka hoggaaminta siyaasadeed la wareegi doonta.

Waxaan kale oo aad ugu faraxsan ahay horuumarka wanaagsan ee aynu ka sameynay asaaska Qaab-dhismeedka Maamulka Baarlamaankeena. Shaqaaleynta ku saleysneyd tartanka furan oo ay ka faa'ideysteen 45 arday shaqobarad ah, hawshaas oo ay inoo fududeeysay deeq aan ka helnay Beesha Caalamka ee Soomaali saaxiibka la ah. Waxaa Iyana dhowaan soo dhamaystirmay tartankii muwaadiniin Soomaaliyeed oo aqoonyahanno ugu tartameen oo ay soo buuxiyeen jagooyinka qaab dhismeedka maamulka Baarlamaanka ka banaanaa oo ay ka mid yihiin xafiisyada Kaaliyeyaasha Xoghayaha Guud, Agaasimayaasha Waaxaha. Sii meeleynta hawlwadeennada iyo shaqaalaha Baarlamaanka u dhamaystirmo, waxaa lagu tala jiraa in tartan gudaha ah oo u xiran shaqaaleheena oo keliya u tartamaan buuxinta jagooyinka hawlfulinta oo ay ka mid yihiin Madaxda Qaybaha iyo Madaxda Xubnaha Qaab-Dhismeedka maamulka Baarlamaanka.

Dhinaca Mashruuca Dhismaha Cusub ee Xarunta Dhexe Baarlamaanka Federaalka, wax horumar sidaa u buuran lagama gaarin. Ballanqaadkii ay sameeyeen deeq bixiyayaashu weli waxaanu sugeynaa in laga dhabeeyo. Si kastaba ha ahaatee,

Guddoonka wuxuu ballan qaadayaa in uu dabagal isdabajoog ah ku sameeyo sidii mashruucan dhismaha xarunta dhexe ee Baarlamaanka Federaalka dhaqaale loogu heli lahaa. Sidoo kale waxaa Guddoonka u socda wadahadal ku saabsan sidii maalgelin loogu heli lahaa Mashruuca dhismahii hore ee baarlamaanka, arrinkaas oo aan idinla socodsiin doono hadba wixii ka suurtagal noqda. Dhinaca kale, dhismaha iyo qalabeynta xafiisyada cusub ee Villa Hargeisa oo loogu talagalay Guddoonka iyo Guddiyada Baarlamaanka waa dhamaystirmay. Waxaa hubaal ah in xafiisyadaasi fududeyn doonaan hawlaha Guddiyada. Waxaa kaloo aan ku talajirnaa in ilaa 25 xafiis aan muddo gaaban ku dayactirno si xafiisyada maamulka Golaheena ku kala nafiso bey'adda shaqadana u noqota mid si xasiloon loogu shaqayn karo.

Hadaba aan fiiradeena u yara leexano dhinaca tilmaamaha caqabadaha aynu waajihi doono.

3 WAA MAXAY CAQABADAHA INA HORTAAGANI?

Xubno Baarlamaan ahaan, waxaynu nahay Wakiilada Dadweynaha. Baarlamaanku waa codka dadka. Shaqadeenu waa in aynu sugno ansixinta sharciyo dalkeena ka dhigi kara mid Diimuqraadiyad xayi ah leh oo dhaqaale ahaan isku filan isla markaana godla kartideena ummadeed, horseedana in nalagu tiriyo dalalka dunida ugu wanaagsan. Waxaa muhiimad gaar ah leh in marnaba aynaan iloobin xaqiiqada ah: marka muddadeenu Baarlamaanku dhammaato bisha Siibtambar ee 2016, waa in dalkan aynu gaarsiinay doorashooyinkiisii ugu horreeyay ee Diimuqraadi ah, ka dib marka la qaato dastuurka oo lagu ansixin doono afti qaran.

In kasta oo horumar badan oo wanaagsan la sameeyay sannaddii aynu soo dhaafnay, aynu gareysano in aynaan wax badan ka qaban sidii lagu hanan lahaa hawlahaa aynu xusnay oo ay ahayd in aynu waajib ahaan gudano. Caqabada asaasiga ihi markaa waxay tahay, in kastoo aynu shaqo wanaagsan qabanay weli uma aynaan daadagin gudashada waajibaadka dhab ahaan horseedi karaya ineynu dalkeena gaarsiino himilooyiinka 2016. Way fududahay in eedda layska saaraa laanta fulinta, haseyeeshee kama dhuuman karno xaqiiqada ah in uu ina saran yahay xilka wakiiladdii dadweyne loona baahyan yahay ineynu curinno shuruuc Dalka u horseedi kara dhismaha siyaasad dimuqraadiyadeed oo fududeeya hanashada himilooyiinka 2016 ee uu Dastuurku hiigsanayo. Waxaa inoo furan fursaddo aynu dib-u-eegis ku sameyn kareyno shuruucdii uu dalku lahaa si aan u waafajino nidaamka federaaliga ah. Waxaan awood u leenahay inaanu u kuurgalno caqabadaha hortaagan shacabkeena isla markaasna u soo saarno shuruuc ka unkanta Golaha dhexdiisa. Shacabkeenu wuxuu baahi weyn u qabaa in difaac sharciyadeed looga sameeyo halisyo badan oo xadgudub ku ah xuquuqda aasaasiga ah ee qofka. Doodaha Golahan Waxaa mararka qaarkood ka soo ifbaxda arrimo dhibaato baahsan ku heysa

Shacabka, haseyeeshee inagoo awoodna inaanu shuruuc lagu xakameenayo dhibaatooyinkaas dejino ayaa haddana aan halkaas laga sii qaadin.

Caqabada weyn ee ugu horreyn ina hortaalaa waa sidii aynu ugu heli lahayn dalkeena nabadgelyo waarta. Waa hawl mudnaanta koowaad leh. Marka nabadda la helo, waxaynu ku tuuntuunsan karaa sidii loo sugi lahaa sarreynta sharciga iyo dawladnimo wanaagga. Dawladnimo wanaagga waa in dhidibada loo aasaa heer walba – heer qaran, gobol iyo degmo. Arrintaasi waxay asaas u noqoneysaa kalsoonida maal-geliyayaasha iyo koboca dhaqaalaheena.

Arrin kale oo u baahan in xoogga la saaraa waa Sharciga la xiriira abuuritaanka xisbiyada siyaasiga oo uu soo raaco sharciga doorashooyinku. Marka taa laga yimaaddo waxaa iyana loo baahn yahay in la dhammeystiro dib-u-eegista dastuurka iyo in lagu ansixiyo afti qaran.

Dhammaan hawshaasi waxay ku suura geleysaa oo keliya haddii aynu noqono kuwo anshaxa ilaaliya! Waxaa la inaga doonayaa in aynu gaarsiino dalkan doorshooyinkiisii diimuqraadiga ah ee ugu horreeyey bisha Siibtambar ee 2016. Sabataa ayaa la inagu doortay bishii August Baarlamaankan. Hawshaa ayaa gacanteena lagu aaminay. Sababtaa ayeynu maanta halkan u fadhinaa. Hawshan ayaa mushaharka la inagu siiyaa, waana shaqadeenii.

Sababtaa awgeed, caqabadeena ugu horreysaa waa *Waqtiga*, maadaamaa la inaga sugayo in aynu hawsha baaxaddaa leh ku gaarno Siibtambar 2016, taasoo ay inaga xigaan 32 bilood oo keliya! Marka aynu eegno hawlaha la innaga doonayo ee ay ka mid yihiin in aynu nabadgelyo ku soo dabaalo dalka, in aynu dhidibada u aasno sarreynta sharciga, abuuritaanka hay'adaha dawladeed si loo sugo dawladnimo wanaag wax ku ool ah, in aynu dib u eegno dastuurka, isla markaana aynu qabano afti qaran si aynu ugu gudubno doorashooyin lagu soo xulo dawladdii ugu horreysay ee si diimuqraadi ah lagu doorto – wey fududahay in la arko in waqtigu aad inoogu yar yahay. Dad badan ayaa ku doodi doona in hawshani tahay mid aan suurtagaleyn. Haseyeeshee, waxaan rumeysanahay in ay tahay hawlgal u qalma in laysku dayo oo dhexda loo xidho, waynuna ka soo bixi karnaa haddii aynu niyadeeda la nimaadno, caqligeena kaashano, Alla weynena talasaarano.

4 MAXAA KU JIRA QORSHEHEENA 2014?

Waxaan jecelahay in aan imminka aan u weecdo dhinaca qorshayaasheena iyo arrimaha Dastuurka na faray oo hortabinta noo leh ee la xiriira sannadkan foodda inagu soo haya. Waxaan diiradda saari doonnaa meelaha ugu muhiimsan ee qorshaheena.

4.1 LA TASHIYADA DHISIDDA NABADDA IYO DAWLADNIMADA

Dhismaha nabad waarta waa arrin mudnaan gaar ah dalkeena u leh. Maadaamaa aynu nahay wakiiladdii dadweynaha, hawshani waxay inooga baahan tahay in si madaalanimo aan uga shaqayno degaamada aynu metelno si aynu u hanano nabad waarta. Waxaa looga baahan yahay Xildhibaannada ka soo wada jeeda deegaan iney si hagar la'aan ah isaga kaashadaan dhidiba u aasidda nabad waarta oo ka hirgasha deegaan doorashooyinkooda. Intaa waxaa dheer, waxaa haboon in aynu goboladeena la sameyno la tashiyo laga qayb geliyo dhinacyada muhiimka ah ee arrintu khuseyso oo dhan. Waxaa inoo qorsheysan inaanu ka hirgalinno kulamo wadatashi oo ay Xildhibaannada oo kaashanaya Xukuumadda ka fulin doonaan deegaanadooda, kulamadaas oo diirada lagu saari doono adkeynta nabadda, baahinta adeegyada Dawladda. Ujeedada la tashiyadaasi waa in in laga tala geliyo dadkeena arrimaha soo socda:

- Tallaabooyinka lagu abuuri karo nabad waarta;
- Abuuritaanka hay'ado dawladeed oo u adeega danaha dadweynaha oo suurtagelin kara gaarsiinta adeegyada ay u baahan yihiin;
- Xaqiijinta dib-u-soo nooleynta sareynta Sharciga iyo dawladnimo wax-ku-ool ah;
- In laga xogwareysto aragtidooda la xiriira dhismaha hay'ado dawladeed oo wax ku ool ah , ha ahaato heer degaan, gobol iyo qaranba;
- In laga xogwareysto aragtidooda la xidhiidha dib-u-eegista dastuurka.

4.2 ABUURITAANKA DAWLADAHA XUBINTA KA AH FEDERAALKA

Dastuurkeena wuxuu dhigayaa in la abuuro Dawlado Xubin ka ah Federaalka. Haseyeeshee, nidaamkii iyo habkii loo mari lahaa abuuritaankaa midina ma qeexna. Waa arrin inaga inoo taal in aynu qeexno. si arrinkan looga gungaaro, waa ineynu dardargelinaa dejinta iyo dhameystirka Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Federaalka iyo Xuduudaha.

4.3 DIB-U-EEGISTA DASTUURKA

Guddiga dib-u-eegista Dastuurka waxaa u suurtagashay inuu dejisto qorshe-hawleedkiisa, diyaariyo talooyiinkiisa ku aaddan dib-u-eegista Dastuurka oo uu u gudbin lahaa Guddiga madaxbannaan ee dib-u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka. Wuxuu kaloo diyaariyey Miisaaniyadii uu ku hawlgali lahaa 2014 oo u suurtagelin doonta inuu gobollada Dalka ku tago latashi dadweyne. Golaha Shacabku 7dii Luulyo 2013 ansixiyey Hindise Sharciyeedka Guddiga madaxbannaan ee dib-u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka, haseyeeshee wuxuu Goluhu ilaa hadda ka sugayaa laanta

fulinta soojeedinta xubnaha Guddiga madaxbannaan si uu uga guto waajibkiisa ansixinta ah.

4.4 AASAASKA XISBIYADA SIYAASIGA AH

Waxaynu haysanaa waqti yar oo aynu ugu diyaar garowno doorashooyinka. Si aynu arrintaa si wanaagsan ugu hirgelino, waxaynu u baahanahay xisbiyo siyaasadeed oo adag oo awood u leh in ay si cadaalad ah u tartamaan. Waxaynu u baahanahay in aynu mudnaanta siino ansixinta sharci ku haboon hawshan, iyo inaan dhisno guddi hoosaad Golaha daraasad uga soo diyaariyo kala xulashada nidaamka siyaasadeed ee axsaabta badan.

4.5 U DIYAAR GAROWGA DOORASHOOYINKA

Diyaarinta doorashooyinku waa arriin degdeg in loo fuliyo loo baahan yahay.

Waxaa jira dhowr arrimood oo loo baahan yahay in laga hawl galo oo ay ku jirto qoritaanka sharci haboon iyo asaaska guddi doorashooyin oo madax bannaan oo leh awooddii iyo kartiddii lagu fulin lahaa aftida dastuurka lagu ansixinayo iyo doorashooyinka Siibtambar 2016.

5 WAA MAXAY TUBTA AYNU HORE UGU SOCONEYNAA?

Sannaka soo socdaa wuxu noqon doonaa mid adag! Waxaa ina sugaya hawlo badan iyo safar dheer oo aynu dalkan ugu horseedi doono doorashooyinkiisii diimuqraadiga ahaa ee ugu horreeyay. Waxaynu u baahn nahay in aynu nabad keeno. Waxaa jira sharciyo badan oo loo baahn yahay in la ansixiyo, hay'ado badan oo ay tahay in la asaaso, iyo dastuurkii oo la rabo in la dhammeystiro hawshiisa. Runtii waa hawlo aad u culus. Haseyeeshee, marka la eego sidii aynu dhowaan isaga dhammeystiray hawshii kalsooni kala noqoshada xukuumadda, waxaa I gashay rajo ah in aynu nahay dal ka gudbi kara carqaladaha horyaala. Inta Illaaheey, Subxaanahu Wa Tacaalaa, inala jirona, wax iskeen hortaagi karaa ma jiraan.

Illaaheey siyaabo badan ayuu inoo imtixaamay, hasyeeshee, Subxaan Allaah waxaynu nahay kuwo aan imaankoodi weli ka tegin. Waxanaan rumeysan ahay in inta aynu haysano nimcadaa, aynu nahay kuwo guuleysanaya, inta ay doonto ha inagu qaadato guushaasiye. Anoo taa maskaxda ku haya, waxaan idin siinayaa tilmaamahan soo socda:

Shaqada degaank waa waajibka ugu muhiimsan ee xubinaha Baarlamaanka oo dhan. Waxaynu u baahn nahay in aynaan ka xiriir furan oo la socono dadka aynu u adeegno, sababtoo ah inagaa ah codkoodii. Marka aynu galo fasaxeena, waa in aynu ku noqonaa dadkeena aynu magacooda ku fadhino xafiiskan. Dadka aynu hayno ammaanadooda.

Waa in aynu ku noqonaa dadkeena oo aynu siinaa warbixin dhan ah oo la xidhiidha horuumarka aynu Baarlamaan ahaan sameynay. Fadlan mar walba xasuusnaada in loo baahn yahay in aynu muujino oo oggaalaano in naylala xisaabtami karo! Waxaynu u baahan nahay in aynu kala tashano dadkeena arrimaha iyaga u muhiimka ah aynuna fahamno waxa mudnaantoodu tahay. Marka aynu hawshaa ku jiro, fadlan hubiya in aad ka warbixisaan geeddi socodka dastuur sameynta kuna wargeliya in ay jiri doonaan la tashiyo dadweyne. Sidaa daraadeed waa in ay dadkeenu isu diyaariyaan in ay cabbiraan waxyaabaha ay ka werwersan yihiin, aragtiyahoodana iyo rajooyinkooda mustaqbalka la xiriirana soo gudbiyaan. Waxaa muhiim ah in aynu dadkeena ka dhaadhicino kuna dhiiri gelino lahaanshaha dadweyne ee dastuurka kama danbeysta ah ayna ka ciyaaraan door libaax sidii asaaska loogu dhigi lahaa aragtida la xidhiidha waxa Soomaaliyada mustaqbalku aynu rabno in ay noqoto. Waxaa muhimad taa la dhiganta leh doodda iyo falanqeynta la xidhiidha abuuritaanka dawladaheena degaanada, gobolada, iyo qaranka ee mustaqbalka. Aragtiyaha dadweyne ee arrintani waa kuwo aad u muhiim ah.

Mar kale, waxaan doonayaa in aan carrabka ku sii adkeeyo in laydinka rabo mid walba oo idinka mid ihi in uu u soo gudbiyo warbixin qoraal ah Baarlamaanka, warbixin taasoo la xidhiidha shaqaddii aad ka soo qabatay degaankaaga. Waa in warbixintaa ay la socdaan tallooyinkaaga la xiriira siddii loo asaasi lahaa xafiisyo degaameed oo goobta aad metesho. Warbixinadaas waxaa la gelin doonaa barta shebekadda internetka ee Baarlamaanka si dadkeena oo dhami uga dheehdaan waajibaadkii dadkeenu inoo soo dhiibtay iyo sida aynu u metelo.

Gebagabaddii, Waxaynu soo maray sannad adag oo dheer dhammaanteen. Sidaa daraadeed waxaa haboon in aad fasaxan u adeegsataan in aad guryihii ku noqotaan, nasataan dibna aad ugu soo kabataan. Waxaan idiin rajeynayaa fasax wanaagsan oo aad muteysateen anigoo idin kaga mahadcelinaya dulqaadkiinii aad ku ogolaateen muddo kordinta intii la soo dhisayey Xukuumadda. u qalantaan iyo in aad waqti la soo qaadataan qoysaskiinii iyo kuwaad jecleydeen. Waxaan jecelahay in aan qoddobkaa ku hakado si aan ugu muujiyo mahad celin weyn shaqaalaha Golaha Shacabka guud ahaan ee nala soo dhabar adeegay iyo gaar ahaan kuwa xafiiskayga ee sida wanaagsan iila shaqeeyey.

Mid walba oo idinka mid ah; waxaan Allaahu SWT uga baryayaa in uu sharta ka xijaabo wax xunna ka badbaadiyo, cafimaad iyo farxadna siiyo. Waxaan rajeynayaa in aynu nabad isugu soo noqono kalfadhiga 4aad ee Baarlamaanka.

QEYBTA 2AAD: SOO-KOOBID WARBIXINTA HAWLAHA GOLAHA GUUD AHAAN

Munaasabadaha ugu muhiimsanaa

10ka Sebteembar 2013	Furitaanka kalfadhiga 3aad waxa khudbad ka jeediyay madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka soomaaliya
31ka Diseembar 2013	Ansixinta Miisaaniyadda 2014 162 cod
21kii Diseembar 2013	Kalsooni siinta Ra'iisul wasaare M.ne Cabdiweli Sh. Axmed 239 Cod
21ka Janaayo 2014	Ansixinta Xukuumadda iyo barnaamijkeeda 186 Cod
22ka Jenaayo 2014	Xiritaankii kalfadhigii 3aad waxa khudbad ka jeediyay Madaxwaynaha J.F Soomaaliya.

QEYBTA 3AAD: HAWLAHA HIRGALAY KALFADHIGA 3-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA 10-ka SABTEEMBAR– 22-ka JENAAYO 2014

Hindise Sharciyeedyada la horkeenay Golaha Shacabka ee weli socda

Hindisayaasha sugaya Codeyn

1. Hindise Sharciyeedka Kaluumeysiga
2. Hindise-sharciyeedka hay'adda Daraasaadka Badaha, oo soo galay 1da Diseembar 2013

Hindisayaasha sugaya akhrinta 3aad

1. Hindise Sharciyeedka Bankiga Horumarinta
2. Hindise Sharciyeedka Guddiga Runta iyo Dib-u-heshiisiinta
3. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha

Hindisayaasha sugaya akhrinta 1aad

1. Hindise-sharciyeedka lagu dhisayo Guddiga Runta iyo Dib-u-heshiisiinta, wuxuu soo galay 11ka Diseembar 2013

Warbixanada la horkeenay Barlamaanka lana Aqriyay

14 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Uganda Xil. Abdulahi Maxmed Xirsi
14 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Ingriiska Xil. Cabdikaafi Macalin Xasan
16 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Puntland Xil. Cabdi Barre
16 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Gedo Xil. Muse Shiikh Cumar
24 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Gedo Xil. Cabdinaasir Gaarane
28 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Hiiraan Xil. Dahir Xasan Cabdi
28 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Gedo Xil. Cusmaan Libaax
28 kii Sebteembar 2013	Warbixintii Shirkii Hiigsiga Qaran Xil.Khaalid
5 tii Oktoobar 2013	Warbixintii Sanaag Xil. Mahdi Cali Cumar
5kii Oktoobar 2013	Warbixintii Shabeellada Dhaxe Xil. Cabdulahi Axmed
9 kii Oktoobar 2013	Warbixinta Guddiga Xeer Hosaadka
3 dii Nofeembar 2013	Warbixinta **IPU** Xil. Khalid Cumar Cali
25 kii Nofeemba2013	Warbixinta Guddoomiyayaasha Guddiyada
26k kii Nofeemba 2013	Warbixinta Guddoomiyaha Guddiga Kaluumeysiga
26 kii Nofeemba 2013	Warbixinta Guddoomiyaha Guddiga Arimaha Gudaha
26 kii Nofeemba 2013	Warbixinta Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka
29 kii Diseembar 2013	Warbixinta Guddiga Dib u Eegista iyo Dhaqan Gelinta Dastuurka Federaalka
30kii Diseembar 2013	Warbixinta Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda ee Sharciga Bankiga Hormarinta iyo Dib u Dhiska Soomaaliya

Ansixinta Miisaaniyadda

1da Janaayo 2014	Ansixinta Miisaaniyada 3 Biloodlaha (Jan - Mar 2014) 169 Cod

Soo jeedinta (Moshin) la horkeenay Baarlamaanka

10 kii Sebteembar 2013	Soo jeedin (motion) in lagu daro xeer-hoosaadka Golaha Shacabka in wasiirrada, wasiir dawlayaasha, wasiir ku xigeennada loogu qaado codka kalsooni siinta mid mid. (waxaa lagu diiday gacan tag 10-9-2013)
15 kii Sebteembar 2013	Soo jeedin (motion) in la hor keeno Golaha Baarlamaanka Heshiskii ay xukuumadu la gashay shirkada Favori kuna saabsan Garoonka Aadan Cade. (waxaa lagu celiyay xukuumadda 15-9-2013, 124 cod ayaa taageertay)
9 kii Janaayo 2014	Mooshin looga soo hor jeedo in xukuumada cusub lagu soo daro xubnihii Golaha wasiirrada ee xukuumadii xilka laga qaaday ee mudane Saacid. (waxaa la diiday 12-1-2014)
14 kii Janaayo 2014	Motion ku saabsan in ajandaha laga saaro codaynta mooshinkii la horkeenay ee ku saabsanaa in aan lagu soo dari Karin xukuumada cusub xubnihii xilka laga qaaday ee xukuumadii mudane saacid. (waxaa la diiday 14-1-2014)
21 kii Nofeembar 2013	Soojeedin (motion) kalsooni kala noqosho R/Wasaare M.ne, Cabdi Faarax Shirdoon Saacid iyo xukuumadiisa, waxaa lagu oggolaaday 184 Cod, 04/12/2013)

Su'aal weydiinta Xukuumadda

23kii Sebteemabar 2013 Su'aalo waydiin wasiirka arimaha dibadda oo ku saabsan:

1. Muwaadiniin soomaaliyeed oo ku xirxiran dalal afrikaan ah.
2. Ku talagalka wasaaradda ee xaalada qaxootiga ee jooga dalal kala duwan
3. Qaabka loo maray magacaabidda iyo isku shaandhaynta safiirrda

2dii Nofeembar 2013	Su'aalo la xiriiray heshiiska Shirkadda Favori oo la waydiiyay Wasiirka Warfaafinta uuna ka jawaabay
8dii Nofeemabr 2013	Soo gudbin ku saabsanin wasiirka gaashaan dhigga iyo wasiirka arrimaha gudaha iyo amniga qaranka si su'aalo la waydiiyo

Qaraarada la horkeenay Golaha, laga dooday lana ansixiyey

28kii Sebteemabar 2013	Qaraarkii Westgate
21kii Diseembar 2013	Qaraarka Xukuumadda loogu fasaxay saxiixa Baratakoolka Ururka Nabadda iyo Ammaanka ee AU
30kii Diseembar 2013	Qaraarka habraaca soo buuxinta kursiga banaanada ee Xildhibanimo
30kii Diseembar 2013	Qaraarka sameynta Curaarta daryeelka deg dega ah ee Xildhibaanada
4tii Janaayo 2014	Qaraarka Sugidda taxanaha golayaasha sharci dajinta ee Somaaliya

Dhaarin xubnaha cusub ee Barlamaanka

26kii Nofeembar 2013	Xil. Axmed Cumar Islow
26kii Nofeembar 2013	Xil. Maxamud Cali Dhuux
28kii Diseembar 2013	Xil. Cabdirizaq Maxamed Warsame Maxamed
20kii Janaayo 2014	Xil. Maxamed Aden Waabaeri

QEYBTA 4AAD: HADALJEEDINTA GUDDOONKA

5tii Oktoobar 2013	Hadaljeedin Guddomiyha Golaha Shacabka warbixin ku saabsan shintiriska barnaamijka howlgalka Baarlamaanka sanadka 2013ka
6dii Oktoobar 2013	Hadaljeedin Guddomiyha Golaha Shacabka khudbad dheer oo ku saabsaneyd waxka badalka habraaca ansixinta Miisaaniyadda iyo shintiriska kalfadhiga 3-aad ee Golaha shacabka
25kii Nofeembar 2013	Hadaljeedin Guddomiyha Golaha Shacabka Bosaska Banaan ee Xildhibaanada sidii loo soo buuxin lahaa
30kii Nofeembar 2013	Hadaljeedin Guddomiyha Golaha Shacabka ee Ku saabsaned xaaladda maanta ay ku sugan tahay Soomaalida joogta Dibadda iyo Gudaha, iyo waajibaadka saaran Golaha Shacabka

28kii Diseembar 2013	Hadaljeedin Guddomiyha Golaha Shacabka kuna saabsan Axsaabta Siyaasadeed
31kii Diseembar 2013	Hadaljeedin Guddomiyha Golaha Shacabka Waxuu ka hadlay miisaaniydda Dowladda
4tii Janaayo 2014	Hadaljeedin Guddomiyha Golaha Shacabka oo ku saabsan Daraasad Taxanaha Golayaashii Sharci dajinta ee Soomaaliya
5tii Janaayo 2014	Hadaljeedin Guddoomiyaha oo ku aadan Hambalyada doorashada Puntland
5tii Janaayo 2014	Hadaljeedin Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay in lagu daro 10 maalmood shaqo